



## Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay soo bandhigeen qorshe dib loogu eegayo magacyada dhismayaasha iyo goobaha dugsiyada degmada

Shirkii Golaha Waxbarashada ee qabsoomay bisha Luulyo 14keeda, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay siidaayeen qorshe dib u habeyn lagu sameynayo habraaca dib loogu magacaabayo dhismayaasha iyo goobaha kale. Tallaabadani dib loo eegayo magacyada dugsiyada degmada waxa ay ku timid iyada oo laga jawaabay deganaansho la'aanta ka socota wadanka dhammaantiis., ay magaalada Portland ka mid tahay, sidii xaggaagani diirada loo saari lahaa falcelinta nidaamka midab-takoorka ah ee dadweynuhu soo bandhigeen.

Dani Ledezma, oo ah xubin la-taliye sare ka ah Dugsiyada Dadweynaha Portland qeybta Cadaalada Bulshada iyo Sinaanta Jinsiyadaha ayaa soo bandhigtay qorshe ay u qortay Guddoomiyaha Waxbarashada Guadalupe Guerrero kaasi oo u wada fudeydin doonaan ardayda PPS. Qorshaha waxaa loo aasaasay Guddidii Dib u Magacaabista iyo Dib u Qeexida oo shaqadooda bilaabi doona bisha Sebtember iyaga oo shaqadoodu mari doonto shan waji.

[\(Halkan ka akhri xaashida fariinta Golaha Waxbarashada\)](#)

Wajiyadaasi shaqada loo qabanayo waxaa ka mid ah in dib u eegis iyo daraasad lagu sameeyo sidii dib magac cusub loogu bixin lahaa Dugsiga Sarre ee Wilson, maxaa wacay madaxweynihii hore ee loo magaacabay waxa la qabaa inuu aaminsanaa midab-takoorka iyo cunsiriyada. Koox ardayda Dugsiga Wilson ka mid ah oo dhaqdhaqaaqan hoggaamineysa sidii iskuulka magac cusub loo siin lahaa kana looga bedeli lahaa.

“Da’ yarta maantu waxa fara badan ayey ka doonayaan hay’adaheena dawlada, iyada oo midab-takoorkii inta badan ay isticmaali jireen noqday wax la soo dhaafay, ayuu yidhi” Guddoomiye Guerrero.

Ledezma waxa ay hoosta ka qariixday muhiimada ay leedahay in si xeel fog loo fikiro ee suurtagal ah lalana shaqeeyo ardayda inta uu socdo nidaamka lagaga hadlayo magac bedelidu. Waxa ay soo jeedisay hab dheelitiran inuu udub dhaxaad u noqdo codka ardayda, gaar ahaa ardayda aan cadaanka ahayn, iyaga oo saf la noqonaya [Qorshaha iyo Qaabka Cadaalada Bulshada iyo Sinaanta Jinsiyadaha](#), sidoo kalena [Aragtida PPS](#).

“Haddii aynu nahay hoggaamiyaashii Dugsiyada Dadweynaha Portland, nidaamka waxbarasho ee pre—K-12 oo da’ diisu oo jirtay 150 sanno, waxa aynu haysanaa fursad aan cudud mideysan ku dhiseyno shaqada sanadaha badan ay soo dadka madowga ahi, dadka asalka ah iyo bulshooyinka aan cadaanka ahayn ay ku diidan yihiin dhaqanka iyo midab kala sooca hay’adaheena ku faaafay nidaamyadii inoo degsanaa, “ayey tidhi Ledezma.”